**Xaaladda amniga Soomaaliya oo soo roonaatay:**

## SIDOO KALE AYAA CODSIYADA DADKA MAGANGALYO DOONKA AH EE SOOMAALIDA AH CODSIYADOODA MAGAN-GALYO WAXAA CULAYSKA LA SAARI DOONAA SHAKHSI WALBA XAALADDIISU SIDA AY TAHAY

Xafiiska imagarayshanku wuxuu dib u eegis ku sameeyey qadiyadda Soomaaliya aragtidii ay ka qaadan lahaayeen. Caddaymaha soo baxay waxay aad ula mid yihiin ama ugu dhow yihiin kuwii todobaadkii la soo dhaafay dib u eegitaankii lagu sameeyey qadiyadda Ciraaq laga qaatay: gaar ahaan xaaladda amniga ee Muqdisho way soo fiicnaatay, taas oo saamayn ku yeelan doonta go'aamada xafiiska imagarayshanku uu ka gaarayo arimaha magangalyada qaxooti codsadayaasha.

Xaaladda Soomaaliya wali way adag tahay, waxaana xaaladda amni daro u dheer in wadanka intiisa badan ay ka jiraan dhibaatooyin la xiriira nolosha macayshaddeeda oo sideeda u xun ama u daran. Xafiiska imagarayshanka caddaymaha u soo baxay waxay qabaan in xaaladda amnigu ay hagaagtay marka loo barbar dhigo daraasayntii hore ee lagu sameeyey Koonfurta- iyo Bartamaha Soomaaliya. Dhammaan dadka dhulkaas ama aagagaas ka yimaada looma arki doono in ay shakhsiyadoodu ama naftoodu khatar ugu jirto dhibaato soo gaarta.

Codsiyada lagu dalbanayo magangalyada dhawritaanka caalamiga ah waxaa loo baari doona si gaar ah oo qof walba shakhsiyadiisa ah, waxaana go'aanka laga qaadan doonaa shakhsi walba goonidiisa wixii caddaadis iyo ciqaab u soo gaaray iyadoo loo eegayo oo lagu miisaamayo caddaymaha la helay ee naga soo gaaray Soomaaliya dhinacyadeeda xogaha aan ka helay ee dhinacca amniga ku saabsan.

**Soomaaliya dhexdeeda waxaa ka jira dad iyaga dhibku iska haysto**

Soomaaliya qaxootiga ka yimaada waxaa ku dhex jira dad fara badan oo sida ay qeexday hay'adda qaxootiga aduunka ee UNHCR-tu ku sheegtay ama siisay darajo ah inay yihiin kuwo loo arki karo inay baahi u qabaan in ay helaan ama la siiyo magangalyo dhawritaan ah oo caalami ah. Marka dadka qadiyadooda shakhsi-shakhsi loo eegayo waxaa fiiro gaar ah la siin doonaa dadkaas, oo ay ka mid yihiin tusaale ahaan haweenka iyo caruurta, xagga galmoodka ama sekshuwaalka dadka laga tirada badan yahay dadka matala, shareecada islaamka iyo Al-Shabaab dadka nidaamkooda khilaafa iyo sidoo kale dadka iyagu dulmanayaasha u ah in lagu khasbo inay al-shabaab ka mid noqdaan.

Xafiiska imagarayshanka waaxdiisa qaxootiga markii ay aragtidan la soo sheegay qadiyadan ka qaadanaysay waxaa la isticmaalay warar xog ah oo laga helay ahna kuwo cusboonaysiin lagu sameeyey oo ay qoreen xafiiska adeegyada joqraafigu. Soomaaliya xaaladdeeda guduhu waa mid aagba si ah oo kala duwan. Xafiisku wuxuu ula soconayaa xaaladda Soomaaliya si joogto ah, wixii isbadal ahna tixgelintooda ayuu siinayaa.

**Faahfaahin dheeraad ah waxay meediyadu ka heli kartaa**

Waaxda magangalyo codsadayaasha qaxootiga hogaamiyahooda Esko Repo, taleefanka 0295 430 431, esko.repo@migri.fi